



Yaanu midkiin ku qaban midigiisa guskiisa isagoo kaadinaaya, oo yaanu midigiisa isaga tirin najaasada, oo yaanu ku neefsan weelka uu ku cabayo

Abii Qataada-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu yiri: "Yaanu midkiin ku qaban midigiisa guskiisa isagoo kaadinaaya, oo yaanu midigiisa isaga tirin najaasada, oo yaanu ku neefsan weelka uu ku cabayo.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu -naxariis iyo nabdi korkiisa ha ahaatee-wuxuu cadeeyey qaar ka mida aadaabta, isagoo reebay in ninku midigiisa ku qabto guskiisa markuu kaadinaayo wuxuu kaloo reebay inuu gacantiisa midig uu kaga tiro najaasada guska ama dabada, waayo midigtu waxay u diyaarsan tahay waxyaabaha fican. Sidaasoo kale wuxuu reebay inuu qofku ku neefsado weelka uu wax ku cabaayo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3079>